

XUQUUQDA RACFAAN-QAADASHADA (APPEAL RIGHTS)

Dib-u-tixgelinta (Reconsideration): Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in Garsooraha Sharciga Maamul (Administrative Law Judge, ALJ) uu dib u tixgeliyo Amarka Kama dambaysta ah. Xeerka Dib Loo Eegay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 34.05.470 iyo Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 388-02-0605. Codsigaagu waa inuu ahaadaa qoraal waana inuu ku helaa ALJ toban (10) maalmood gudahooda kadib taariikhda boostada laguugu soo diray Amarka Kama dambaysta ahaa. Codsiga waa in la helaa 5:00 galabnimo maalinta u dambaysa. WAC 388-02-0035(2). Codsiyada la soo galiyo Bogga Intarneetka ee Ka Qeybqaataha ama lagu helo fakis kadib 5:00 galabnimo waxaa loo calaamadayn doonaa sida in la helay maalinta shaqada ee xigta maalintaas. Haddii codsiga dib u tixgelinta lagu helin muddada tobankaan maalmood gudahooda, lama tixgalin doono, oo wakhtiga looga codsanayo dib-u-eegista maxkamadda sare ayaa sii soconaya.

Haddii codsiga dib-u-tixgelinta lagu soo gudbiyo wakhtiga loogu talagalay, ALJ waxa uu haystaa labaat (20) maalmood si uu u go'aamiyo codsiga ama uu kuugu soo diro adiga iyo dhinacyada kale ogeysiis qoran oo qeexaya taariikhda ALJ uu go'aamin doono codsiga. Codsiga dib-u-tixgelinta waa la diidayaa haddii wax tallaabo ah uu qaadi waayo ALJ muddada labaatanka maalmood gudahooda ah. Haddii codsiga lagu soo gudbiyo wakhtiga loogu talagalay, wakhti jadwaleedka lagu codsanayo dib u eegista maxkamada sare waxay bilaaban doontaa taariikhda amarka dib u tixgelinta la soo diray.

Haddii aad xareysato codsiga dib u eegista, waxaa loo diri doonaa dhinacyada kale. Waa inaad ka saartaa dhammaan macluumaadka qarsoodiga ah ee aadan rabin in dhinacyada kale ay ka helaan gudaha codsiga dib u eegista Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka ayaa ka saari doona cinwaankaaga codsiga dib u eegista. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad ka saarto dhammaan macluumaadka kale ee qarsoodiga ah ee aadan rabin in dhinacyada kale ay helaan.

Dib u eegista Maxkamada Sare (Superior Court Review): Waxa kale oo aad xaq u leedahay in aad rafcaan uga qaadato Amarka Kama dambaysta ah maxkamada sare sodon (30) maalmood gudahooda kadib taariikhda boostada laguugu soo diray Amarka Kama dambaysta ah. RCW 34.05.542(3) iyo WAC 388-02-0645. Uma baahnid inaad xaraysato codsi dib-u-tixgelin ka hor inta aanad ka codsan dib-u-eegis maxkamad sare. Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada (Department of Health and Social Services, DSHS) kama codsan karto dib u eegis maxkamad sare. Fadlan ka tixraac WAC 388-02-0650 wixii macluumaad ah ee ku saabsan sida loogu gudbiyo codsigaaga dib u eegista maxkamad sare.

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.

CODSIGA DIB U TIXGELINTA (CODSIGA DIB U TIXGELINTA)

Magaca:

Lambarka Aqoonsiga **Lambarka Kiiska**

Lambarka DSHS

Fadlan sharax sababta aad u rabto in Amarka Kama dambaysta ah dib loo tixgeliyo. Isku day inaad si gooni ah u qeexo. Tusaale ahaan, sharax:

- Sababta aad ugu malaynayso in Amarka uu khaldan yahay (maxaad u khilaafsan tahay iyada).
- Sida aad u rabto in Amarka wax looga beddelo.
- Muhiimada xaqiiqooyinka qaarkood ee ay tahay in Garsooraha Sharciga Maamul uu tixgeliyo.

Waxaan rabaa in Garsooraha Sharciga Maamulku uu dib u tixgeliyo Amarka Kama dambaysta ah sababtoo ah:

FADLAN GELI MACLUUMAADKAAGA XIDHIIDHKA BOGGA XIGA

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.

DCS Final Order – Establishment Appeal Rights | Reviewed 5/5/2025 | Translated 6/2025

Macluumaadka Xidhiidhka ee Qarsoodiga ah

Cinwaanka:

Telefoonka:

Boosta ugu dir:

Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka
PO Box 42489 Olympia, WA 98504

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto
dukumeentiyada aad heshay.**

DCS Final Order – Establishment Appeal Rights | Reviewed 5/5/2025 | Translated 6/2025

**OGEYSIISKA KU SOCDA DHINACYADA KU FASHILMA INEY KA SOO MUUQDAAN
DACWAD DHAGEYSIGA (NOTICE TO PARTIES WHO FAILED TO APPEAR)**

Amarkani waa kama dambeys. Si kastaba ha ahaatee, dhinac kasta oo lagu haysto ku fashilmida qaadida tallaabo looga baahnaa ayaa soo gudbin karta codsi ah inay ka baxdo Amarka Kama Dambaysta ah ee La Gaadhay Mar Dhinac Ay Seegtay Dacwad-dhageysiga oo dib loogu soo celiyo dacwad dhageysiga. Qoladu waa inay ka muujisaa sabab wanaagsan oo ah inay ka soo muuqan waayaan dacwad dhageysiga la qorsheeyay. Codsiga ka bixidu waa in uu helaa Xafiiska Dacwad Dhegeysiga Maamul ama Guddiga Racfaanka ee DSHS 21 maalmood gudahooda kadib taariikhda boosto ku soo dirista amarkan. Waa inaad ku soo dirtaa Codsigaaga ciwaanka soo socda:

Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka
PO Box 42489 Olympia, WA 98504

Codsiga in Laga Baxo Amarka Kama Dambaysta ah ee La Gaadhay Mar Dhinac Ay Seegtay Dacwad-dhageysiga iyo foomka Dib u soo-celinta Dacwad dhageysiga ayaa ku lifaaqan. Xeerarka ka bixida Amarka Kama Dambaysta ah ee La Gaadhay Mar Dhinac Ay Seegtay Dacwad-dhageysiga waxa lagu sheegay Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 388-14A-3700, WAC 388-14A-6150 iyo Xeerka Madaniga 60 ee Maxkamadda Sare ee Washington.

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.

DCS Final Order – Establishment Appeal Rights | Reviewed 5/5/2025 | Translated 6/2025

**CODSIGA IN LAGA BAXO AMARKA KAMA DANBEYSTA AH EE LA GAADHAY MAR
DHINAC AY SEEGTAY DACWAD-DHAGEYSIGA OONA DIB LOO SOO CELIYO DACWAD-
DHAGEYSIGA (PETITION TO VACATE FINAL DEFAULT ORDER AND REINSTATE
HEARING)**

Magaca:

Lambarka Aqoonsiga **Lambarka Kiiska**

Lambarka DSHS

Waxaan codsanayaa in dacwad dhageysigeyga dib loo soo celiyo. Sababta aan uga soo muuqan waayey dacwad dhegeysigayga waa:

Saxiixa iyo Taariikhda

FADLAN GELI MACLUUMAADKAAGA XIDHIIDHKA BOGGA XIGA

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto
dukumeentiyada aad heshay.**

DCS Final Order – Establishment Appeal Rights | Reviewed 5/5/2025 | Translated 6/2025

Macluumaadka Xidhiidhka ee Qarsoodiga ah

Cinwaanka:

Telefoonka:

Boosta ugu dir:

Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka
PO Box 42489 Olympia, WA 98504

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto
dukumeentiyada aad heshay.**

DCS Final Order – Establishment Appeal Rights | Reviewed 5/5/2025 | Translated 6/2025

SHAACINTA/CADDEEYNTA ADEEGGA(DECLARATION OF SERVICE)

Waxaan ku caddeenayaa sida hoos imaata ganaaxa been-abuurka ee hoos timaada shuruucda Gobolka Washington in maanta aan u gudbiyay dukumeentigan mid kasta oo ka mid ah dhinacyada hoos ku taxan. Waxaan koobi u diray dhinacyada ciwaankoodu ku jiro diiwaanka anigoo isticmaalaya Adeegga Boostada ee Isku-dhafka ah, Boostada Mareykanka, ama iimayl amni-sugan.

Liiska qof kasta oo la soo diray Amarkan.

Ku taariikheysan **Taariikhda marka Amarka la bixiyay oona boosta looga diray, Magaalada,** Washington.

(TAARIIKHDA BOOSTO KU DIRISTA)

Wakiilka

Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka

PO Box 42489 Olympia, WA 98504

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.

DCS Final Order – Establishment Appeal Rights | Reviewed 5/5/2025 | Translated 6/2025